# Waxa ay tahay inaad ka ogaato dhegaysiga dib u eegista xabsi ku haynta

Haddii lagugu xidhay Hay'adda Adeegga Xuduudaha ee Kanada (CBSA) sababo socdaalka ah, waxaad yeelan doontaa dhegaysi dib u eegis ku saabsan xabsi ku hayntaada horta Qaybta Socdaalka ee Guddiga Socdaalka iyo Qaxootiga ee Kanada (IRB). Macluumaadka soo socda ayaa kaa caawin doona inaad fahamto nidaamka dib u eegista xabsiga iyo waxa aad filan karto.

## Maxaa dhacaya marka lagu xiro:

1. Marka CBSA ay ku qabato, waa inay u sheegto Qaybta Socdaalka ee IRB.
2. Waxaad xaq u leedahay dhegaysiga dib u eegista xabsiga 48 saacadood gudahooda ka dib marka lagu xiro ama sida ugu dhaqsaha badan ka dib. CBSA lafteedu way ku sii dayn kartaa ka hor inta aan dhegaysigani dhicin. Haddii CBSA ay ku sii dayn weydo, Qaybta Socdaalka ee IRB waxay qaban doontaa dhegaysi dib u eegis ah.
3. Waxaad heli doontaa ogaysiis kuu sheegaya goorta iyo goobta lagu qabanayo dhegaysigaaga.
4. Waa inaad sidoo kale heshaa nuqullo ah dukumeenti kasta oo CBSA rabto inay u isticmaasho caddayn ahaan dhegaysigaaga.
5. Dhegaysigaagu waxa uu ku dhici karaa maqal-muuqaal, telefoon, ama qof ahaan.
6. Qofka guddoominaya dhegaysigaaga - oo loo yaqaanno xubin - ayaa go'aamin doona in lagu sii daayo ama lagu sii hayo.

**Waa inaad ogaataa:** Dhammaan dhegaysiyada IRB waxaa loo qorsheeyay xagga habka maqal-muuqaalka. Si kastaba ha ahaatee, waxaad sidoo kale codsan kartaa dhegaysi qof ahaan ah. Haddii qof uu ku matalaayo, waa inay codsiga qoraal ku sameeyaan. Adiga laftaadu waxaad samayn kartaa codsiga – ha ahaato qoraal ama hadal.

## Waa maxay doorka IRB ee dib u eegista xabsiga?

Xubin ka tirsan Waaxda Socdaalka ee IRB ayaa dhagaysan doonta kiiskaaga oo go'aamin doona in lagu sii daayo ama lagu sii hayo. IRB waa sida maxkamad oo kale, laakiin aan rasmi ahayn. Waxay soo saartaa go'aamo si sharci ah loo fulinayo.

Waa inaad ogaataa: Qofka go'aaminaya in lagu sii dayn doono ama lagu sii hayn doono waa xubinta Laanta Socdaalka, oo sidoo kale loo yaqaan xubinta.

## Waa maxay doorka CBSA ee dib u eegista xabsiga?

Wakiilka CBSA ayaa ka qayb qaadan doona dib u eegista xabsigaaga oo kuu sharaxi doona sababta laguu xidhay. Wakiilka CBSA ayaa soo bandhigi doona caddayn. Wakiilku waxa laga yaabaa inuu ku doodo in aad xabsiga ku sii jirto ama waxa uu ku talin karaa in lagu sii daayo.

**Waa inaad ogaataa:** Wakiilka CBSA waxaa sidoo kale loogu yeeraa wakiilka Wasiirka ama la-taliyaha Wasiirka.

## Waxaad qabsan  kartaa qof ku matala

In kastoo aad naftaada ku matali karto dhegaysigaaga, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad qabsato la-taliye ku caawiya. La-taliyuhu wuxuu noqon karaa qareen ama la-taliye socdaal oo diiwaangashan. Haddii aad joogto Quebec, la-taliyuhu wuxuu kaloo noqon karaa nootaayo. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad bixiso kharashka la-taliyahaaga.

Haddii aanad haysan lacag kugu filan oo aad ku bixiso la-taliye, waxa laga yaabaa inaad hesho caawimo sharci oo bilaash ah. Gobollada iyo dhulalka qaarkood waxay siiyaan gargaar sharci oo bilaash ah dadka u qalma. Qaar ka mid ah bulshada ama ururada diinta ee caawiya soogalootiga iyo qaxootiga ayaa sidoo kale laga yaabaa inay ku caawiyaan. Weydii sarkaal jooga meesha lagugu hayo inuu kaa caawiyo inaad la xidhiidho gargaar sharci ama la-taliye kale. Haddii aad go'aansato inaad qabsato la-taliye ama in qof ku caawiyo, waa inaad sida ugu dhakhsaha badan u samaysaa.

Saaxiib ama xubin qoyska ka mid ah ayaa sidoo kale noqon kara la-taliyahaaga haddii aysan ka helayn lacag xagga gargaarkooda.

## Sababaha suurtogalka ah ee lagugu xidhay

Wakiilka CBSA wuxuu waydiisan karaa xubinta Waaxda Socdaalka inay ku sii hayaan haddii CBSA ay aaminsan tahay in ugu yaraan mid ka mid ah xaaladaha soo socda ay ku khusayso:

## Waxay u badan tahay inaad khatar ku tahay dadweynaha

Si ay u  taageerto mawqifkeeda, CBSA waxay bixin  kartaa tusaalayaal xagga noloshaada ah:

- Ka tirsanaanta urur dambiilayaal
- Dambiyo lagu xukumay ama dacwadaha u taagan ee dembiyada galmada, dembiyo daroogada qaarkood la xiriira, ama dembiyada ku lug leh rabshadaha ama hubka
- Dhaqan kasta, hawlo iyo dhacdooyin taageeraya sheegashada oo lagu tixgeliyo khatar

Waxaad keeni kartaa caddayntaada iyo doodahaaga si aad u tusto xubinta sababta aadan khatar u ahayn.

## Waxay u badan tahay inaadan soo muuqan doonin dhegaysiga socdaalka ama ka saaridaada Kanada

Si loo taageero mawqifkeeda, CBSA waxa laga yaabaa inay ku siiso tusaalayaal wakhtiyo markaad:

- kasoo muuqan weydo xagga arrimo ku saabsan socdaalka ama maxkamadda
- ma aadan  raacin shuruudaha
- dal ayaad sharci darro  ku soo gashay
- ka baxsatay xabsiga

Waxaad keeni kartaa caddayntaada iyo doodahaaga si aad u tustid xubinta in aad soo xaadiri  doonto marka sidaas lagu weydiiyo.

## Aqoonsigaaga lama xaqiijin laakiin way  noqon kartaa

Waxaa laga yaabaa inaad Kanada timid adigoon haysan waraaqo aqoonsi ama waraaqo aqoonsi oo been abuur ah. Waxaa laga yaabaa in CBSA aysan awoodin inay xaqiijiso aqoonsigaaga.

**Waa inaad ka caawisaa CBSA inay caddayso aqoonsigaaga.** Waxa aad sidaas ku  samayn kartaa adigoo isku dayaya in aad hesho dukumentiyada aqoonsiga iyo in aad bixiso macluumaad ka caawin doona CBSA in la sugo  aqoonsigaaga.

Xubinta Qaybta Socdaalka waxay tixgalin doontaa dadaalka CBSA, iyo la shaqayntaada CBSA si loo caddeeyo aqoonsigaaga, ka hor inta aan la go'aamin inaad sii wadato xabsigaaga ama in la amro siideyntaada.

## Waxaa laga yaabaa inaan laguu ogolaan karin Kanada sababo ammaan dartood ama ku xad-gudub xuquuqul insaanka ama caalami ah dartood, fal dembi culus, dembi, ama abaabul dembi.

CBSA ayaa kuu sharixi doonta tillaabooyinka ay qaadayaan inaad tahay mid aan loo ogolaanin mid ka mid ah sababahan. Xaaladdan oo kale, xubinta Waaxda Socdaalka ayaa kaliya oo eegi karta in CBSA ay hayso tuhun macquul ah oo ay qaadayso tillaabooyin lagama maarmaan ah si ay u baadho.

**Muhiim:** Si taxadar leh u dhegeyso waxa wakiilka CBSA leeyahay. Haddii aadan wax fahmin, weydii sharaxaad.

## Qodobo kale oo lagu tixgalin doono dib u eegista xabsiga

Xubintu waa inay tixgelisaa sababaha laguu hayo iyo sidoo kale:

- inta aad xabsiga ku jirtay
- ilaa inta ay sii hayntu qaadan karto haddii aan lagu sii dayn
- haddii adiga ama CBSA aad sababteen dib u dhac aan la sharraxin
- wax kasta oo ka duwan xabsiga ee la heli karo
- danaha ugu wanaagsan ee ilmo kasta oo ay si toos ah u saamaysay

Waxaad soo bandhigi kartaa caddayn iyo dood ku saabsan mid ka mid ah arrimahan si ay xubintu u tixgeliyo.

## Maxaa ka dhacaya dib u eegista xabsiga

1. Xubintu waxa ay bilaabi doonta inuu qof walba baro una sharaxo waxa dhici doona. Haddii aadan fahmin Faransiiska ama Ingiriisiga, turjumaan ayaa joogi doona dhegeysiga si uu kuugu turjumo. Haddii uu joogo turjubaan dhegaysigaaga, xubintu waxay hubin doontaa inaad is fahmaysaan.

   **Muhiim:** Haddii aad u baahan tahay turjumaan oo midna aanu joogin, u sheeg xubinta isla markaaba.

2. Wakiilka CBSA ayaa sharixi doona sababta laguugu hayo (**sababta lagu hayo**) wuxuuna soo bandhigi doonaa cadaymo iyo doodo taageeraya mowqifkooda. In ka badan hal sabab oo laguu hayo ayaa la bixin karaa.
3. Adiga iyo la-taliyahaaga waxa la siin doonaa fursad aad kaga jawaabto, aad soo bandhigtaan cadaymahaaga iyo doodahaaga, oo aad su'aalo ku waydiisaan.
4. Wakiilka CBSA waxaa laga yaabaa in loo ogolaado inuu ka jawaabo wixii aydin sheegteen adiga ama la-taliyahaaga.
5. Haddii ay jiraan markhaatiyaal dhegeysiga jooga si ay u bixiyaan macluumaad, wakiilka CBSA, adiga, la-taliyahaaga, ama xubinta ayaa laga yaabaa inay su'aalo weydiiyaan.
6. Kadib marka la dhegaysto wakiilka CBSA, adiga ama qareenkaaga, iyo marqaati kasta, xubintu waxay go'aamin doontaa in lagu sii daayo ama lagu sii hayo.

## Waxaa laga yaabaa in uu jiro beddelka xabsiga

Beddelka haynta waa qorshe sii-dayn ah oo ay ku jiraan **shuruudo** ay tahay inaad adeecdo. Waxaad soo jeedin kartaa beddelka xabsiga. Markaad isu diyaariso dhegaysigaaga, waa inaad ka fikirtaa habab macquul ah oo lagu beddeli karo xabsiga. Shuruudaha waxaa ka mid noqon kara:

- siinta CBSA ciwaanka aad degayso

- si joogto ah ugu warbixi CBSA
- addeecidda bandowga
- la noolaanshaha qof gaar ah
- ka fogaanshaha cabbitaanka khamriga ama qaadashada mukhaadaraadka
- shardi kasta oo kale oo kiiskaaga looga baahan yahay

Xubinta ayaa go'aamin doonta haddii shuruuduhu lagama maarmaan yihiin iyo waxa ay noqonayaan.

## Beddelka xabsiga waxa kale oo ku jiri kara dammaanad

Waxaa jira 2 nooc oo dammaanadeed:

- **Dhigaal** (oo sidoo kale loo yaqaan lacag dammaanaded oo caddaan ah): Lacagta waxaa la dhigaa xagga dowladda ka hor inta aan lagu sii deyn. **Haddii aad u hoggaansami weydo shuruudaha**, dawladda Kanada ayaa lacagta hayn doonta iyadoo CBSA-na laga yaabo inay mar kale ku qabato oo ku xidho. **Haddii aad addeecdo shuruudaha**, CBSA waxay ugu dambeynta u soo celin doontaa lacagta qofka dammaanadda qaaday.

- **Dammaanad qaad** (sidoo kale loo yaqaanno dammaanadda waxqabadka): Dammaanad-qaaduhu wuxuu ballan qaadayaa inuu bixiyo qaddar lacag ah haddii aadan u hoggaansamin shuruudaha sii deynta**. Haddii aad u hoggaansami weydo shuruudaha**, Dawladda Kanada ayaa lacagta ka qaadi doonta dammanad-qaadaha, iyadoo laga yaabo in CBSA ay mar kale ku qabato oo ku xidho. Xagga dammaanad-qaadka, dammaanad-bixiyuhu waa inuu noqdaa muwaadin Kanadiyaan ah ama deggane rasmiya ee Kanada waana inuu muujiyaa inay awoodaan inay bixiyaan lacagta dammanaadda oo ay hubiyaan inaad u hoggaansanto shuruudaha sii-deynta**.**

Qofka bixiya dammaanadda waxaa loo yaqaan dammanad-bixiye. Xagga dhegaysigaaga, wakiilka CBSA iyo xubintu waxay waydiin karaan dammaanad-qaadahaaga la soo jeediyay macluumaad ka caawin doona xubinta inuu go'aamiyo in dammaanaddu haboon tahay iyo in kale. Dammaanad-bixiyahaagu wuxuu bixin karaa macluumaadkan ka hor dhegeysiga isagoo buuxinaya **foomka Macluumaadka Dammaanad-qaadaha**.

**Waa inaad ogaataa**: Dammaanad-qaaduhu wuxuu noqon karaa saaxiib, xubin qoyska ka mid ah, shaqaale bulshada ah ama xitaa adiga naftaada.

Waa inaad tixgelisaa dammaanadda mustaqbalka, inta lacag ah ee loo heli karo dammaanadda, iyo macluumaad kasta oo kale oo aad bixin karto si aad xubinta uga caawiso inuu go'aansado. Waa inaad sidoo kale hubisaa in dammaanad qaadaha la heli karo inta lagu jiro dhegeysiga si uu uga jawaabo su'aalaha wakiilka CBSA iyo xubinta.

## Marka aad heli doonto go'aan

Kadib markaad la dhegaysto labadoodaba wakiilka CBSA iyo adiga ama la-taliyahaaga, xubinta Waaxda Socdaalka ayaa go'aamin doona in lagu sii dayn doono ama lagu sii hayo. Xubintu waxay caadi ahaan bixin doontaa go'aanka iyo sababaha go'aanka kadib dhammaadka dhegeysiga. Si kastaba ha noqotee, haddii arrimuhu ay aad u adag yihiin, xubintu waxay u baahan kartaa wakhti dheeraad ah si uu u eego dhammaan caddaymaha si loo diyaariyo go'aankooda.

## Maxaa dhacaya haddii xubintu go'aamiso inaad xabsiga ku sii jirto

Haddii lagugu amro inaad xabsiga ku sii jirto, waxaad dib u eegis kale yeelan doontaa 7 maalmood gudahood. Dib u eegista 7-da maalmood ah, haddii xubin ka tirsan Waaxda Socdaalka uu amar ku bixiyo xabsi ku hayntaada mar kale, hayntaada ayaa dib loo eegi doonaa 30 maalmood gudahood, iyo 30 maalmood oo kasta wixii ka dambeeya ilaa lagu siidaayo ama lagaa saaro Kanada. Dib-u-eegis kasta ee xabsi ku haynta, waxaad soo bandhigi kartaa xaqiiqooyin cusub si aad u taageerto codsiga sii-daynta. Haddii xaaladaadu isbeddesho inta u dhaxaysa dib u eegisaha xabsiga, waxaad waydiisan kartaa Qaybta Socdaalka dhageysi horleh.

## Maxaa dhacaya kadib marka lagu sii daayo

Kadib marka lagu sii daayo, haddii aad Kanada joogto, waa inaad u hoggaansantaa shuruudaha sii deyntaada. Shuruudahani waxay ahaan doonaan kuwo kuu sii socon doonaan adiga ilaa lagaa saarayo Kanada ama ilaa inta la beddelaayo ama la joojiyo.

## Waxaad waydiisan kartaa Qaybta Socdaalka inay beddesho ama tirtirto shuruudahaaga

Haddii xaaladaadu isbedesho kadib marka shuruudo lagugu soo rogo, warqad u qor Qaybta Socdaalka oo aad ugu sharaxayso sababta aad u malaynayso in xaaladdaada la beddelo una dir nuqulka warqadda xagga CBSA. Waxaad isticmaali kartaa **foomka Codsiga in wax laga beddelo shuruudaha siideynta** si ay kaaga caawiso qoritaanka warqaddan.

**Muhiim**: Haddii wasiirku kuu aqoonsaday **inaad tahay dhalasho ajnabi ah**, inta badan macluumaadka halkan lagu soo bandhigay kuma khuseyso waxaana laga yaabaa inay 14 maalmood noqoto kahor dib u eegistaada xabsiga ee koowaad. Haddii aad tahay **la aqoonsade ajnabi ah**, xubinta IRB ee dhegaysigaaga ayaa kuu sharixi doona sida dib u eegista xabsiyadu u shaqeyso xagga dadka xaaladaada ku sugan.

**Si aad wax badan uga ogaato**: Macluumaadkani wuxuu ku salaysan yahay Sharciga Ilaalinta Socdaalka iyo Qaxootiga ee Kanada, Xeerarka Ilaalinta Socdaalka iyo Qaxootiga, Xeerarka Qaybta Socdaalka, iyo Tilmaamaha Guddoomiyaha IRB ee 2 (Xadhiga). Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad la tashato dukumentiyadan si aad faahfaahin dheeraad ah u hesho.